

City of Seattle - Faa'iidooyinka Marka La Jaleeco

(Barnaamijka Dheefta Ku Meel Gaarka ah ee uu Heli Karo Shaqaalaha *)

U-qalmitaanka: Haddii aad tahay shaqaale u qalma dheefta ku meel gaadhka ah oo shaqeyta wakhtiga buuxa ama wakhtiga nus-gelinka (loo qorsheeyay inaad shaqeyso ugu yaraan 80 saacadood bishii), waxaad xaq u leedahay inaad ka qaybgasho barnaamijyada dheefaha markaad buuxiso shuruudaha u-qalmitaanka booskaaga:

- Hal ama In Ka Badan Oo Shaqo Ku Meel Gaar ah/Muddo-gaaban: Kadib shaqadaada mudada gaaban ee ilaa 1 sano ay ee gaarto 1,040 saacadood.
- Shaqada Muddada Xaddidan - taariikhdaada shaqo qorista ee shaqadaada 1-3 sano haddii taariikhdaasi ay tahay maalinta ugu horreysa ee bisha loo qoondeeyay inay noqoto maalin shaqo oo Magaalada ah ama maalinta taariikhda ugu horreysa ee bisha loo qoondeeyay ama loo aqoonsaday inay tahay maalinta ugu horreysa ee shaqada gelinka lagu qoray. Haddii ay shaqadaadu bilaabato taariikhdan ka dib, caymiskaagu wuxuu bilaabmayaa maalinta ugu horeysa ee bisha kadib taariikhda aad xaq u leedahay.

Ku-tiirsaneyaasha U-qalma: Shakhsiyadka u qalma caymiska waxaa ka mid ah xaaskaaga ama lammaanahaaga guriga, carruurta aad dhashay ama carruurta aad korsatay ama carruurta lagu meeleeeyay inaad korsato, carruurta lammaanahaaga guriga, carruurta adeerka ama eeda u tahay ee xaaskaaga ama ninkaaga, iyo ilmo kasta oo aad u tahay mas'uul sharci ah ama kaas oo caymiska uu u baahan yahay Amarka Takhasuska Taageerada Caafimaadka Ilmaha. Carruurta qaangaarka ah waxay xaq u leeyihiin caymis haddii ay ka yar yihiin da'da 26. Haddii aad ku darto kuwa ku tiirsan, waxaa lagu waydiin doonaa dukumeenti si loo caddeeyo u-qalmitaanka caymiska iyada oo loo marayo qorshayaasha Magaalada Seattle.

Diwaangelinta: Waa inaad isku diwaangelisaa muddo 30 maalmood gudahooda ee taariikhda u-qalmitaanka dheefaha. Haddii aad ku guul dareysato inaad isku diwaangeliso 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda u-qalmitaanka dheefaha, waxa si toos ah laguugu qori doonaa caymiska aragga iyo ilkaha ee aasaasiga ah. Caymiskaaga ilkaha waxay ku dhici doontaa qorshaha Delta Dental of Washington. Haddii aad dhawaan u qalantay caymiska caafimaadka oo aadan si firfircoon u dooran ama aadan uga tanaasulin caymiska caafimaadka, waxa si toos ah laguugu qori doonaa qorshaha shaqaalaha-kaliya ee Aetna, kaas oo aan kaa doonaynin wax lacag ah.

Ilkaha: Waxaad ka dooran kartaa laba qorshe ilkeed - Delta Dental of Washington ama Dental Health Services. Qorshayaasha ilkuhu waxa ka mid ah caymiska dadka ku tiirsan ee xaq u leh. Caymiska waxaa si buuxda u daboolay Magaalada Seattle.

Aragga: Waxaad dooran kartaa qorshaha aragtida VSP. Kharashka qorshaha aragtida waxaa si buuxda u daboolay Magaalada .

Caafimaadka: Waxaad ka dooran kartaa Kaiser Permanente Standard Plan, Kaiser Permanente Deductible Plan, Aetna Preventive Plan, ama Aetna Traditional Plan. Qiimaha bishii ee qorshayaasha mid kasta waa sidan soo socota:

Qorshe Caafimaad	Wax ku biirinta Billaha ah ee Shaqaalaha	
	Shaqaaale**	Shaqaaale & lammaanaha ama mmaane guri ***
Ka-hortaga Aetna	\$48.12	\$98.50
Hab-qorsheedka Aetna	\$0.00	\$32.34
Heerka Kaiser Permanente	\$48.40	\$99.90
Kharashka Jeeb-ka Laga Bixinaayo ee Kaiser Permanente	\$25.00	\$56.92

** caruur leh ama aan lahayn

Adeegyada Qareenka: Shaqaalaha iyo xubnaha qoyska lagu daboolay caymiska waxay heli karaan adeegyada u doodista Accolade. Caawiyaha Caafimaadka waxay bixiyaan taageero shaqsi ahaaneed aan wax kharash ah la bixinayn. Caawiyaha Caafimaadku waa kayd hal-joojin ah oo lagaga jawaabo su'aalaha caafimaadka iyo dheefaha,

waxayna la shaqeyaan koox dhakhaatiir ah, kalkaaliyeyaal caafimaad, iyo qubaro dheefaha takhasus u leh si ay gacan uga gaystaan nidaamka daryeelka caafimaadka.

Caymiska Naafanimada Aasaasiga ah ee Muddada Dheer:

Haddii aad naafo noqoto, kadib 90-maalmood ee muddada sugitaanka, qorshuhu wuxuu ku siin doonaa dheef aasaasi ah oo dhan \$400 bishii marka aadan awoodin inaad shaqeyso. Lacagta aasaasiga ah ee naafanimada muddada-dheer waxaa si buuxda u bixisa Magaalada.

Caymiska Aasaasiga ah ee Noloshu Kooxda Aasaasiga ah:

Waxaad ka dooran kartaa mid ka mid ah labada qorshe - Kooxda Aasaasiga ah ee Muddada Caymiska Noloshu kaas oo ah hal-jeer iyo bar dakhligaaga sanadlaha ah ama Caymiska Noloshu Muddada Kooxda Aasaasiga ah ee xaddidan ee \$50,000. Magaaladu waxay bixin doontaa 40% kharashka Caymiska Noloshu Muddada Kooxda Aasaasiga ah.

*Waxa ku jira shaqaalaha ku meel gaadh ah ee muddada gaaban/ku meel gaadh ah ilaa 1 sano (kadib marka ay shaqadu gaarto 1,040 saacadood). Iyo shaqaalaha ku meel gaar ah oo ku jira shaqada ku meel gaar ah ee xaddidan (1-3 sano).

Dheefaha Hawlgabka

Nidaamka Hawlgabka Shaqaalaha Magaalada Seattle (Seattle City Employees' Retirement System, SCERS I iyo II): Shaqaale ku meel gaar ah ayaa laga yaabaa inuu doorto inuu ku biiro Nidaamka Hawlgabka Shaqaalaha Magaalada Seattle:

1. 6 bilood gudahood marka la dhammeeyo 1,044 saacadood ee adeega wakhtiga tooska ah ee magdhowga ah; ama
2. Marka loo magacaabo boos u qalma haddii magacaabista ay dhacdo ka dib markay shaqadu dhammaatay 1,044 saacadood oo adeegga

Magaalada ah laakiin ka hor intaanay dhammayn 10,440 saacadood oo adeegga magaalada ah; ama

- Muddo 6 bilood gudahood ah marka la dhammeeyo 10,440 saacadood oo adeeg magdhow ah oo joogto ah.

Waxaa jira laba qorshe hawlgab oo loogu talagalay shaqaalaha Magaalada oo ku kala duwan wax ku biirinta, da'da ugu yar ee hawlgabka, celceliska mushaharka ugu dambeeya, iyo faa'iidada la kasbado sannadkii ee la kordhiska adeegga.

SCERS I (la shaqaaleysiiyay oo la diiwaan galiyay Janaayo 1, 2017): Waxaad wax ku biirisay 10.03% Magaaladu waxay sidoo kale bixinaysaa 15.29% oo mushaharkaaga ah ku bixinaysa hawlgabnimadaada.

SCERS II (la shaqaaleysiiyay Janaayo 1, 2017 ama ka dib): Waxaad wax ku biirisay 7.0% Magaaladu waxay sidoo kale 14.42% oo mushaharkaaga ah ku bixinaysa dhinaca hawlgabnimadaada.

Tabarrucaadka iyo dakhliga cashuurta dib ayaa loo dhigaa. Adiga ayaa 100% iska leh tabarrucaadkaaga iyo dakhligooda. Waxaad noqonaysaa qof gaar u ah (u-qalmo dheefta billaha ah ee da'da hawlgabka) kadib shan sano oo adeeg ah. Haddii aad ka tagto shaqada magaalada ka hor hawlgabka oo aad ka noqoto tabarrucaadkaaga, xaq uma yeelan doontid mid ka mid ah tabarrucaadka Magaalada.

Haddii aad u soo shaqeysay dawlad-goboleedka ama dawladaha kale ee hoose ee maxaliga ah, waxa laga yaabaa inaad u qalanto inaad wakhtigaaga adeeg isugu geysa si aad ugu qalanto hawlgabka.

Waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad wax badan ku keydsato hawlgabkaaga iyada oo loo marayo Qorshaha Magdhawga Dib-u-dhigista ee Ikhtiyaariga ah ee Magaalada (eeg hoos).

Qorshaha Magdhowga Dib-u-dhigista ee Ikhtiyaariga ah: Diiwaangelinta Qorshaha Magdhawga Dib loo dhigay ee Magaalada ee 457 waa mid ikhtiyaari ah. Waxa lagu oggol yahay inaad wax ugu darsato hab mushahar dhimis. Adiga ayaa go'aaminaya qadarka dollarka, nooca wax ku biirinta, iyo fursadaha maalgashiga. Waxa laga yaabaa inaad ku darsato ugu yaraan \$10 mushaharkiiba. Isbeddelka diiwaangelinta iyo wax ku biirinta ayaa la samayn karaa wakhti kasta. Magaaladu kuma darto wax ku biirintaada.

Dheefaha iyo Barnaamijyada shaqo/Nolosha

Reach: Waxaa laga yaabaa inaad ka qaybqaadato Reach, oo ah barnaamij ikhtiyaari ah oo toos ah iyo app-yo ku salaysa faydaqabka oo loogu talagalay shaqaalaha iyo lammaanaha is qaba/lamaanayaasha guriga ee lagu daboolay caymiska. Reach waxa ay ku siinaysa howlo muuqato, agab waxtar leh, iyo nuxur waxbarasho si ay kaaga caawiyaan inaad gaadho hadafkaaga dhaqaale, qireed, bulsho, iyo shaqo oo aad ku raaxaysato safarkaaga.

Barnaamijka Caawinta Shaqaalaha (Employee Assistance Program, EAP): Ilaha Nololeed EAP waxay adiga iyo xubnaha qoyskaaga siisaa adeeg tixraac iyo latalin. Hel caawinaad qarsoodi ah oo ku saabsan arrimaha gaarka ah sida walbahaarka, niyad-jabka, iyo dhibaatooyinka qoyska iyo xiriirka. Xubin kasta oo qoyska

ka mid ah waxa uu xaq u leeyahay lix kulan oo saacad ah oo lacag la'aan ah sannadkiiba.

Gaadiid Ku Safarka: Waxaad xaq u leedahay inaad hesho Kaarka Baasaboorka ee ORCA, kaas oo si buuxda u bixiya dhammaan gaadiidka dhulka ku salaysan, oo ay ku jiraan tagsiga biyaha iyo Kitsap Fast Ferry. Waxaan sidoo kale bixinaa wada safarka baabuur raacida iyo dheefaha doomaha rakaabka kaliya ah ee gobolka WA. Haddii aad isticmaashid mid ka mid ah ikhtiyaarka safarka ee aan darawalka lahayn, waxa kale oo aad xaq u leedahay adeegga Guri Raacida la dhammaanad qaaday - raacitaanka tagsiga ee la bixin karo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah oo qoys ama caafimaad.

Fasaxyada: Magaaladu waxay leedahay 12 fasaxood oo rasmi ah iyo 2 fasaxyo oo gaar ah. Waxaad qaadan kartaa fasaxyadaada gaarka ah wakhti kasta iyadoo la raacayo ogolaanshaha kormeerka.

Fasaxa: Waxaad kasbatay fasax ku salaysan saacadaha heerka mushaharka caadiga ah. Qadarka fasaxa la kasbaday waxay ku xiran tahay muddada adeeggaaga - laga bilaabo 12 maalmood sannadkii ee shaqaalaha cusub ilaa 30 maalmood sannadkii ka dib 29 sano oo shaqo ah. Saacadaha fasaxa ee aan la isticmaalin waxaa dhib loo dhigan karaa sannad kasta, ilaa ugu badnaan, iyadoo ku xidhan sanadaha adeegga.

Fasaxa jirada: Waxaad kasbatay fasaxa jirada iyadoo lagu salaynayo tirada saacadaha caadiga ah ee la shaqeeyay. Shaqaalaha wakhtiga buuxa waxay qaataan 96 saacadood oo fasax jirro ah sannadkii. Waxa laga yaabaa inaad dib u dhigato fasaxaaga jirada ee aan la isticmaalin, ma jirto dhib u dhigasho ugu badan.

Fasaxyada Kale: Magaaladu waxay kaloo bixisaa fasaxyadan soo socda ee lacag bixin ah iyo kuwa aan la bixin lahayn: fasaxa waalidnimo ee la bixiyo, fasaxa boroor diiqa ah, fasaxa qoyska iyo caafimaadka, fasaxa uurka, waajibaaadka xeerbeegtida, fasaxa waajibaaadka milatariga, fasaxa ku deeqida xubin jirka ah, fasax shakhsi ah oo aan mushahar lahayn, iyo fasax nasasho.

Shaqaaluhu sidoo kale waxay haystaan ikhtiyaarka ah inay codsadaan Barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Lacag-bixineed ee Washington marka lagu daro fasaxyada a sare ee Magaalada.



Seattle
Human Resources

La cusbooneysiisay 12/16/2022